**Badbaadinta Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya**
**Soo jeedin wax ka qabasho**

**Dr. Cabdinuur Sheekh Maxamed Maxamuud**
**Wasiirkii Hore ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare**

Soomaaliya waxaa soo food-saaray qalalaase sharciyadeed oo is-biirsaday. Bisha Maarso 5teeda, sannadka 2026, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ansixiyay qodobbo wax lagaga beddelaayo Dastuurka dalka, kuwaa oo kordhinaaya muddo-xileedka Madaxweynaha iyo xubnha baarlamaanka oo muddadoodu afar sano ahayd lagana dhigayo shan sano, taa oo meesha ka saaraysa dhammaadka muddo-xileedyada xubnaha Baarlamaanka iyo Madaxweynaha oo ku kala muddaysnaa 14ka bisha Abriil iyo 15ka bisha May, sannadka 2026, sida ay u kala horreeyaan. Wax-ka-beddelladaan Dastuurka waxaa la ansixiyay iyada oo aan la helin aqlabiyadda laba-meelood-meel xubnaha baarlamaanka, taa oo ay weheliso in aan horay loo helin wadar oggolaanshaha Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah dowladda Federaalka, isla markaana aan si buuxda loogu baahin diiwaanka wax-ka-beddellada Dastuurka. Dood adag oo Dastuuri ah ayaa ka taagan tallaabadaas oo ayna aqbalin saamilayda siyaasadeed ee muhiimka ah, sidaas awgeedna wax-ka-beddellaasi dhaqangalkooda mugdi gelinaaya. Sidaas darteed, Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya oo lagu soo aasaasay shirkii dib-u-heshiisiinta qaran ee sannadkii 2000 lagu qabtay magaalada Carta ee dalka Jabuuti waxay u muuqataa mid ku jirta xaalad halis ah waxaana laga yaabaa in aanay sii jirin haddii aan deg deg loo gaarin heshiis siyaasadeed cusub oo loo dhanyahay, ka hor dhammaadka muddo-xileedka madaxweynaha JFS ee 15ka May, sannadka 2026.

Waxaa muhiim ah in aan dusha laga istaagin indhahana laga fiirsan xaaladaha adag ee uu dalku marayo xilli addunku uusan nidaam iyo sharci toona ku shaqeyn, xal soomaaliyeedna oo dambena uuna diyaar u ahayn.  Waxaa loo baahan yahay in la helo afkaar iyo talooyin kala duwan oo wax ku soo kordhiya xal u helidda khilaafka siyaasadeed ee ka jira dalka.

Soo-jeedintani waxay wax ka qabanaysaa soona bandhigaysaa xal looga gudbi karo mowqifyada siyaasadeed ee iska soo horjeeda ee ay kala taagan yihiin Dowladda, hoggaamiyeyaasha Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo mucaaradka ee la xiriira arrimaha cakiran ee Dastuurka iyo doorashooyinka. Soo-jeedintani waxay sidoo kale horraantaba ka duulaysaa caddaynta in wax-ka-beddelladii Dastuurka ee bisha Maarso 2026 uu ku dhaqaaqay Baarlamaanka Soomaaliya ay weli doodo ka taaganyihiin oo aanay u dhigmi karin hannaan doorasho oo lagu heshiiyey. Waxaa aad la isugu raacsan yahay in dhammaystirka Dastuurka ku-meel gaarka ah la gaari karo haddii

habka, geeddi-socodka, iyo natiijooyinka laga dhigo kuwo cad, hufan, oo loo dhanyahay. Waxaa iyaduna jirta in geeddi-socodka doorashooyinka xilliga kala-guurku u baahan yahay hoggaan adag oo ay ka go'antahay dejinta qaab-dhismeed iyo hab-raac cad oo gaar ah oo ku saleysan dhammaan habab-raacyada sharci iyo hay'adeed ee lagama maarmaanka ah sida Dastuurka qeexayo.

Soo-jeedintan waxaa loogu talo-galay in ay noqoto tubraac lagu gaarayo heshiis siyaasadeed iyo in la bilaabo wada-hadal qaran oo wax-ku-ool ah, si loo dejiyo xiisadaha siyaasadeed ee hadda jira iyo hubanti la'aanta ka dhalanaysa waxa dhacaya marka muddo-xileedka madaxweynuhu dhammaado bisha May 15keeda , 2026 oo aan wax badan ka harin. Soo-jeedintu waxay tixgelinaysaa mowqifyada iyo murannada ka taagan dhammaan arrimaha la isku hayo, sidaas darteedna waxay soo bandhigaysaa xal tanaasul ah oo suuragelinaya in la qabto doorashooyin baarlamaan iyo madaxweyne oo lagu kalsoonaan karo loona dhanyahay, kuwaas oo la qabanayo muddoo aan ka dambayn bisha Maarso 2028.

## Meelayn

**Soo-jedintan waxaa saldhig u ah meelaynta qodobbada siyaasadeed, Dastuureed, iyo bulshadeed ee soo socda:**

Muddo-xileedyada Dastuuriga ah ee Baarlamaanka iyo Madaxweynaha Soomaaliya ee hadda jira waxay dhammaanayaan bisha Abriil 14keeda iyo bisha May 15 keeda, sannadka 2026, sida ay u kala horreeyaan.

1. Wax-ka-beddelka Dastuurka ee sannad ku kordhinaya muddo-xileedyada xubnaha Baarlamaanka iyo Madaxweynaha qaranka waa tallaabo siyaasad ahaan dood ka taagan tahay, aan loo dhammayn, sidaas darteedna aan Dastuurka waafaqsanayn.
2. Sida uu qabo Dastuurka ku-meelgaarka ah, ma jiri karo firaaq siyaasadeed oo dalka ka dhaca ka dib Abriil 14 iyo May 15, 2026. Dowladda hadda jirta waa in ay sii shaqeysaa ilaa laga gaarayo heshiis siyaasadeed iyo dowlad kale oo tan hadda jirta beddesha.
3. Soomaaliya waxay deg-deg ugu baahan tahay heshiis siyaasadeed buuxa oo la gaaro ka hor biha May 15 keeda, 2026.
4. Madaxda dowlad-goboleedyada ee muddo-xileedkoodu dhammaaday waxay sii wadi doonaan shaqadooda ilaa laga qabanayo doorashooyin qof iyo cod ah oo ku qotoma jadwal qaran oo lagu heshiiyey.
5. Waxaa aad la isugu raacsanyahay in Soomaaliya ka guurto doorashooyinka dadban ee xildhibaannada ay si gaar ah u soo xulaan madaxda federaalka ama kuwa gobollada, taa oo wax u dhimaysa sumcadda habraaca doorasho.
6. Doorashooyinka dadban waa in laga guuro oo lagu beddelaa cod-bixinta caalamiga ah ee ay xaqa u leeyihiin dhammaan muwaadiniinta qaan-gaarka ahi, sidaas darteedna dadwaynhu ay ka qayb-qaataan doorashooyin qof iyo cod ah oo loogu tartamayo golayaasha deegaanka, duqayda magaalooyinka, murashaxiinta baarlamaannada gobollada iyo madaxweynayaasha gobollada.

7. Doorka haweenku ku leeyihiin dowladda iyo ka-qaybgalka siyaasadeed waa inuu noqdaa mid muuqda, caddaalad ku dhisan oo macquul ah.
8. Habka awood-qaybsiga 4.5 wuxuu abuuray fursad ka-mid-noqosho siyaasadeed. Si ay ahaataba se, waa in lagu xoojiyaa nidaam u-qalmid iyo karti waxqabad ku salaysan, si loo abuuro jawi ku habboon maamul-wanaag, isla xisaabtan, iyo hufnaan.
9. Dalku wuxuu u baahanyahay in la ilaaliyo nidaamka kala-soocidda awoodaha ee ku xusan Dastuurka, iyadoo la kala saarayo laamaha fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorka. Dalku wuxuu u baahan yahay garsoor waxtar leh iyo maxkamad Dastuuri ah oo madax-bannaan oo kala xukunta murannada iyo dacwooyinka doorashooyinka iyo xad-gudubyada Dastuurka.

## 2. TALO

**Madaxweynaha iyo mucaaradku waa in ay si niyad-wanaagsan ku dhisan u gaaraan heshiis siyaasadeed, si loo samatabixiyo Jamhuuriyadda Saddexaad loogana badbaadiyo dalka colaad sokeeye, xasillooni-darro iyo/ama kala go'id.**

Si looga gaashaanto firaaq siyaasadeed oo dhaca, waa in dawladda iyo mucaaradku ku heshiiyaan magacaabista **xirfadle dhex-dhexaad ah oo noqda Raysal-wasaaraha Dowladda Midnimada Qaran oo muddadeedu labo sano tahay, taan oo ka bilaabmaysa bisha May 15-keeda, sannadka 2026**. Raysal-wasaaraha cusub wuxuu xilkiisa gudan doonaa isaga oo si buuxda uga madaxbannaan madaxweynaha, mucaaradka, iyo baarlamaanka.

### 2.1 Maamul Dawladeed Ku-meelgaar ah

### Kordhinta Muddo-xileedka

Dadku badanaa way neceb yihiin kordhinta muddo-xileedyada, laakiin caadi ayay iska noqotay in mas'uuliyiinta Soomaaliyeed ee xilka haya ay aalaaba dib u dhigaan hawlaha kala-guurka, iyagoo hunguriyeeynaya sii wadidda muddo-xileedkooda afarta sano ku ekaa ee loo dhaariyay. Hase yeeshee, si looga fogaado firaaq siyaasadeed loona xaqiijiyo kala-guur xileed nidaamsan iyo xasillooni siyaasadeed, kordhin muddo-xileed oo xaddidan waxay muhiim u tahay jiritaanka dowladda gaar ahaan Madaxweynaha iyo xubnaha Baarlamaanka, ayna hawshooda sii wataan ilaa la helo dowlad bedesha oo sharciyaysan. Qodobkani waa mid horseedi kara in la gaaro heshiis siyaasadeed. Muddo-kordhintani waxay ku xaddidan tahay xayndaabka soo-jeedintan xal-raadiska ah, iyada oo aan wax loogu dhimayn dhinacyada is-haya, waana dacar kharaar oo la wada dhadhaminayo lagama maarmaanna u ah badbaadinta qaranka, si aanu mar kale u gelin burbur dowladeed, ama ka sii daran e dalka u horseedda colaad sokeeye oo hor leh.

**Madaxweynaha iyo xubnaha Baarlamaanka oo ka kooban labada aqal ee Sare iyo Hoose waxay heli doonaan kordhin muddo-xileed laba sano ah, laga bilaabo May 15, 2026 ilaa May 14 2028, taa waxaa barbar socda muddada Dowladda Midnimada Qaran ay dalka ugu diyaarinayso cod-bixin guud oo lagu hirgelinayo doorashooyinkii muddada dheer la sugayay ee qof iyo cod.**

Madaxweyne-goboleedyada muddo-xileedkoodu dhammaaday ama dhammaan doono inta lagu jiro muddada kala-guurka ah waxay sii shaqayn doonaan ilaa May 14 keeda, 2028, xilligaa oo doorashooyinkii la qabtay sida jadwalka ku xusan.

**Qodobbo Reebban**

**Raysul-wasaaraha cusub iyo xubnaha Golaha Wasiirrada ee Dowladda Midnimada Qaran waxaa gebi ahaanba ka mamnuuc ah in ay u tartamaan jagada madaxweyne-nimada, doorashada xigta oo keli ah si ay awoodooda isugu geeyaan in ay dalka ka saaraan xaaladdan siyaasadeed ee cakiran.**

**Madaxweynaha iyo Guddoomiyeyaasha Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare ee baarlamaanka waxaa gebi ahaanba ka mamnuuc ah in ay u tartamaan doorashooyinka xiga, mana qaadi karaan wax tallaabo ah oo la adeegsanayo hantida xafiiska qaran, galaangalka dowladda, ciidammada amniga, ama warbaahinta dowladda, si ay ugu ololeeyaan murashaxiinta ay isku siyaasadda yihiin ama ay dhankooda u janjeeraan.**

Qof kasta oo hadda haya jagada madaxweyne-nimada qaran iyo guddoomiye-nimada labada aqal ee baarlamaanka ee damacsan in uu isu sharraxo doorashooyinka qaran ee soo socda waa in uu si deg-deg ah uga degaa jagada uu hayo, ka hor inta aanay bilaaban muddo-xileedka ku-meelgaarka ah. Sida kor xusan, qof kasta oo haaya jago madaxweyne, guddoomiye baarlamaan, raysal-wasaare ama xubin ka noqda golaha wasiirrada ee Dawladda Midnimada Qaradan gebi ahaanba waa ka mamnuuc in ay isu sharaxaan doorashooyinka ay ayaga mas'uulka ka yihiin qabashadooda.

**2.2 Dawladda Midnimo Qaran, Xubnaha, Muddo-xileedka, iyo Magacaabidda Jagooyinka Heer Wasiir**

**Xubnaha**

Magacaabidda xukuumad Midnimo Qaran oo ku-meelgaar ah, muddo-xileed xaddidan laga bilaabo May 15, 2026, ilaa May 14, 2028, oo ka kooban xubnaha soo socda:

I. **Raysal-wasaare**: Dooro shaksi xirfad-dawladeed, karti la xaqiijiyay leh una dheer tahay khibradda maaraynta kalsoonida dadweynaha. Dawlad iyo mucaaradba waa in ay ku heshiiyaan murashaxa ugu habboon jagada.

II. Golaha xukuumaddu wuxuu ka koobnaan doonaa 25 wasiir (sida haddaba jirta).

a) Xukuumadda iyo mucaaradka, mid kastaa wuxuu soo bandhigayaa liis 7 ruux ah oo u qalma jago heer wasiirnimo.

b) Ra'iisul wasaaraha ayaa soo xuli doona 7 wasiirro xirfadlayaal-dawladeed oo dheeri ah.

c)Dawladda iyo mucaaradka midkiiba 1 jago wasiirnimo oo haween ah ayuu soo bandhigayaa, Ra'iisulwasaaruhuna 2 jago wasiirnimo oo haween ah; sidaa ayay jagooyinka wasiirnimo ee haweenku 4 ku noqonayaan.

III. Xulashada wasaaradaha ay wasiiradu hogaamin doonaan waxaa iska leh Raysal-wasaraha oo kali ah, isaga oo ka madaxbannaan faragelinta madaxweynaha iyo mucaaradka, Raysal- wasaaruhuna waa in uu wada-tashiyo ballaaran sameeyo.

IV. Sida ugu suuragalsan, magacaabista iyo xulashada jagooyinka wasiirrada
waa in ay ku saleysnaadaan isku-jir ka kooban u-qalmid buuxinta shuruudo jago, iyada oo dhanka kalena isha lagu haayo habka awood-qeybsiga ee 4.5.

**Xilka**

Marka laga soo tago xilka Dastuuriga ah ee Raysal-wasaaraha, xilalka ugu mudan ee saaran xukuumadda Midnimada Qaran waxaa ka mid ah:

a. In la diyaariyo, lana qabto oo lagu soo gebagebeeyo si tartiib-tartiib ah doorashooyinka deegaanka iyo federaalka oo ay ku jiraan doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha muddada labada sano ah ee xilliga ku-meelgaarka ah, waana in aanay ka dambayn Maarso 31, 2028. Muddayntan waxaa ku dhex jira muddo 45 cisho ah oo saamaxaysa inta uu xilka la wareegayo madaxweynaha cusub ee la doortay ugu dambayn bisha May 15 keeda, 2028.

b. in la sameeyo tubraac kala-guur ah oo ka kooban:

i. Dhamaystirka Dastuurka ku-meel-gaarka ah

ii. Dejinta shuruucda doorashooyinka

iii. Fududeynta wada-hadal loo dhanyahay iyo dib-u-heshiisiin qaran, si loo xoojiyo qarannimada iyo midnimada.

iv. Dawladda Midnimo Qaran waa in ay ka shaqeysaa oo ka dhex muuqataa dalka oo dhan waana in aanay hawsheedu aysan ku koobnaan magaalada Muqdisho

v. Intii suuragal ah, xubnaha golaha wasiirradu waa in ay waqti la qaataan bulshada ay metelaan, iyaga oo si toos ah uga qayb-gelinaya arrimaha tubraaca kala-guurka ah ee iyo horumarinta hadafka guud ee Dawladda Midnimo Qaran.

vi. in la yareeyoo socdaallada dibedda taa bedelkeedana la dhiirigeliyo socdaallada shaqo ee dalka gudihiisa ah.

c. Adkaynta amniga qaranka lana xoojiyo tababbarka iyo u diyaar-garowga dhismaha ciidan qaran oo Xoogga Dalka ah, lana dejiyo qorshe cad oo lagu soo afjarayo joogitaanka ciidamada shisheeye ee dalka ku sugan ugu dambeyn bisha May 14 keeda, 2028, ama ka hor.

d. Hay'adaha dowliga ah oo lagu xoojiyo tayooyinka dawlad-wanaaga, aamminimada, hufnaanta, xirfadda iyo isla-xisaabtanka.

e. In la sameeyo siyaasad-dejin aan innaba loo dulqaadan karin musuqmaasuqa iyo qaraabo-kiilka iyo in la soo celiyo golihii qaran ee madaxa bannaannaa ee la-dagaallanka musuqmaasuqa.

f. in la bixiyo adeegyo dowladeed si loo horumariyo daryeelka bulshada, amniga, caafimaadka dadwaynaha, waxbarashada, beeraha, kalluumaysiga iyo adeegyada caafimaadka xoolaha.

g. In la wanaajiyo wadashaqeynta dowlad-goboleedyada oo iyagana laga doonayo in ay ku shaqeeyaan mabaadi'da aaminidda, hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.

**Magacaabidda Heerka Wasiir**

Golaha Wasiirada ayaa magacaabaya jagooyinka dowladeed ee soo socda, iyadoo loo eegayo karti shaqo iyo qaacidada awood-qaybsiga beeleed:

1. Taliyaha Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed
2. Taliyaha Booliska Qaranka
3. Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed
4. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
5. Xeer Ilaaliyaha Guud
6. Hantidhawrka Guud
7. Guddiga madaxa bannaan ee dib u eegista dastuurka
8. Guddiga la-dagaalanka musuqmaasuqa, iyo
9. Guddiga (komishanka) Doorashooyinka Qaranka.

**2.3 Korjoogtaynta iyo Xallinta Is-mariwaaga**

Haddii dowladda iyo mucaaradka ay ku heshiin waayaan soo xulista Raysal-wasaaraha, waxaa arrinta loo gudbinayaa Golaha Dhexdhexaadinta iyo Korjoogtaynta Qaranka Soomaaliyeed oo degddeg loo abaabulo

.

Goluhu wuxuu ka koobnaan doonaa wakiillo 21 xubnood ah:

- 15 wakiil oo ka kala socda dawladda, mucaaradka iyo Dawlad-goboleedyada Federaalka.
- 5 wakiil oo isgu jira odayo dhaqameed, culumada, haweenka, dhallinyaro, ganacsatada, qurbajoogta, iwm.
- 1 shakhsi Soomaali ah oo madax-bannaan oo la isku raacsanyahay maqaam sarena leh oo noqda Guddoomiyaha Golaha.

Muddo 14 maalmood gudahood ah waa in uu Goluhu heshiis ka gaaro musharaxa Raysal-wasaaraha noqon doona. Hadii talada la isku mari waayo, Goluhu waa in uu keenaa talo tanaasul oo dhinacyada waajib ku ah oo arrinta laga gaaro qaybna ka ah xasilinta xilliga ku-meelgaarka ah. Cidna dood ay ka qabto magacaabidda Raysal-wasaaraha uma adeegsan karto dib u dhigista, hakinta, ama ragaadinta barnaamijka kala-guurka.

Isla Golaha ayaa sidoo kale korjoogtayn doona Dawladda Midnimo Qaran inta lagu jiro xilliga ku-meel-gaarka, si loo xaqiijiyo u-hoggaansanaanta waajibaadkeeda, waqtiyada, iyo ballan-qaadyada, iyo in wax laga qabto wax kasta oo keenaya ka-weecashada waajibaadka lagu heshiiyey. Saaxiibada dowladaha deriska la ah Soomaaliya iyo kuwa caalamkaba ayaa geeddisocodka taageeri doona islamarkaana markhaati iyo damaanadqaad ka noqon doona heshiiskaas. Hase ahaatee habraacau wuxuu ahaanayaa mid Soomaaliyeed oo ay Soomaalidu hoggaaminayso.

### 2.4 Maamulka Dawladeed ee Ku-meelgaarka ah iyo Qaab-dhismeedka Dastuurka

Madaxweynaha iyo Baarlamaanku waxay sii wadi doonaan shaqadooda oo gabi ahaanba ku-meelgaar ku xaddidan, ujeeddada keli ah ee laga leeyahayna tahay dhismaha Xukuumadda Midnimada Qaran iyo qaabaynta habraaca doorashada baarlamaanka iyo madaxtooyada.

Soo-jeedintan ku-meelgaarka ah kama dhigna muddo-kororsi buuxa oo dastuuri ah, mana ansaxinayso wax-ka-beddelkii dastuurka lagu muransanyahay ee Maarso 2026 ee waxa la filayaa in tubraaca cusub ee Xukuumaddu ku shaqayn doonto Dastuurkii ku-meelgaarka ahaa ee 2012 iyo tubraaca cusub oo ay iyadu jeexato. Wax-ka-beddelka Dastuurka ee mustaqbalka waxaa la samayn doonaa iyaga oo qayb ka ah qorshaha cusub ee ay dejiso Xukuumadda Midnimada Qaran.

**Raysul-wasaaruhu waa madaxa Xukuumadda Midnimada Qaran, isaga ayaana si buuxda mas’uul uga ah hawlmaalmeedka dawladda.**

Inta lagu jiro muddada ku-meel-gaarka ah, xilka Madaxweynuhu gabi haanba wuxuu noqonayaa mid jago- sharafeed. Madaxweynuhu wuxuu si gaar ah xoogga u saarayaa nabadda, dib-u-heshiisiinta, iyo midnimada qaranka. Waa in aanu faragelin arrimaha maalin-laha ah ee Dawladda Midnimada Qaran, awood fulineed ku yeelan arrimaha

miisaaniyada, amniga, doorashada, waana in aanu ku kicin falal dib u dhigi kara ama hor istaagi kara habsami u socodka hawlaha cusub ee doorashada qof iyo cod ee lagu gaarayo tubraaca ay dejiso Dawlada Midnimada Qaran.

Baarlamaanku waxa uu sii wadanayaa hawlihiisa Dastuuriga ah, waana in uu ku shaqeeyaa daah-furanaan iyo isla la-xisaabtan dadwayne.

### 2.5 Jadwalka iyo Hannaanka Hirgelinta

U-hoogaansanaanta aan gorgortanka lahayn ee laga doonaayo dhammaan dhinacyada ay khusayso taladaan waa in doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha lagu qabto xayndaabka Dastuuri-siyaasadeed ee sharciga ah. Maarso 31, 2028, waa kama-dambaysta muddada ay doorashooyinku dhamaan ku soo wada af-jarmaan. Tubraac sugan oo lagu gaarayo doorashooyinka waa in uu hagaa gudashada waajibaadka aasaasiga ah ee Dawladda Midnimada Qaran.

| Xilalka la doorto | Cidda maamulaysa | Taariikhda |
|---|---|---|
| Golayaasha deegaanka, Duqayda magaalooyinka, xildhibaannada goboleed, Madaxweynayaasha goboleed | Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Gobolka | Maarso 15, 2028 |
| Xildhibaannada Federaalka | Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Federaalka | Maarso 31, 2028 |
| Doorashada Madaxweynaha Federaalka | Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Federaalka | Maarso 31, 2028 |

### Hannaanka Fulineed

| Hawl | Masuul | Muddo-xileed | Laga doonayo | Natiijada |
|---|---|---|---|---|
| Magacaabista Dowladda Midnimada Qaran ee ku-meelgaarka ah | Heshiis wadajir ah oo u dhexeeya dowladda iyo mucaaradka | Muddada kala-guurka ee dhammaanaysa ugu dambayn May 14, 2028, iyadoo doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha oo ku | In la qabto doorashada baarlamaanka iyo madaxweynaha, ugu dambayn Maarso 31, 2028. | Baarlamaan cusub iyo Madaxweyne cusub oo la doorto ugu dambayn May 15, 2028 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | dhammaanaya Maarso 31, 2028 | | |
| Xulashada iyo magacaabista Ra'iisul Wasaaraha xilliga kala-guurka | Heshiis wadajir ah oo u dhexeeya dowladda iyo mucaaradka | Tubraaca doorashooyinka qof iyo cod lagu qabanayo hal sano gudaheed. Maamul-wanaag iyo bixinta adeegyada dadweynaha | Tubraac qeexan oo loo samayo cod-bixin guud iyo hirgelinta doorasho qof iyo cod ah. Xasillooni siyaasadeed iyo midnimo qaran | Soomaaliya oo noqota dowlad sharciyad leh oo nabad ku wada nool deriskeedana nabad kula nool. |
| Magacaabista Wasiirrada Xukuumadda | Ra'iisulwasaaraha oo talagelinaya Dowladda iyo Mucaaradka | Maamul-wanaag, farsamo-yaqaannimo dawladeed iyo muddo laba sano ah oo lagu qabto doorashooyin | Dowlad Midnimo Qaran oo shaqaynaysa | Xasillooni siyaasadeed, maamul-wanaag |
| Dib u dhisidda Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduuddaha Qaran | Golaha Wasiirrada Dawladda Midnimo Qaran | Ugu dambayn 30 maalmood gudahood, ka dib dhisidda DMQ (Juun 2026) | Guddiga Qaran ee Doorashooyinka iyo Xuduuddaha madax-bannaan, si buuxda loo dhisay, oo shaqaynaya; waajibka loo igmaday iyo sharciyaddiisana la baahiyay | Hay'ad doorasho oo lagu kalsoonaan oo smaaysan; diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo qiimeynta suurtagalnimada Qof iyo Cod oo la sii wado |
| Qiimayahta Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduuddaha Qaran: ansixinta suuaraglnimada doorasho Qof iyo Cod ah | Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Xuduuddaha Qaran; Dowladda, Dawladgoboleedyada iyo talooyinka qiimeynta amni ee mucaaradka | Ugu dambayn Sebteembar 2026 (warbixin la ansixiyay lana baahiyay) | Warbixin la ansixiya oo faahfaahinaysa diiwaangelinta codbixiyeyaasha, diyaargarowga hawlgalka, iyo suurtagalnimada amni ee dhammaan Dawladgoboleedyada | Doorasho Qof iyo Cod ah; habka doorashada madmadow dambe ku jiri doono |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Magacaabista hoggaannada muhiimka ah ee dastuurka iyo amniga (sida kor ku xusan) | Golaha Wasiirrada DMQ (u-qalmid iyo qaaciddada awood-qaybsiga beelaha ee 4.5) | Ugu dambayn 30 maalmood gudahood, ka dib dhisidda DMQ (Juun 2026) | Dhammaan sagaalka jago oo la buuxiyay oo shaqaynaya, sida ku cad qaybta Magacaabista Heerka Golaha Wasiirrada | Hay'adaha dastuuriga ah oo si buuxda u shaqaynaya kuna hoos jira awoodda DMQ |
| Bilaabidda iyo qabashada wada-hadal qaran oo loo dhanyahay oo ku saabsan wax-ka-beddellada dastuurka lagu muransan yahay ee Maarso 2026 | DMQ; mucaaradka; madaxda fulineed Dawladgoboleedyada; Baarlamaanka | May 2026–May 2028 (inta lagu jiro muddada ka-meelgaarka ah oo dhan) | Geeddisocod dib-u-eegis loo dhan yahay laguna heshiiyey oo ku saabsan wax-ka-beddellada dastuur ee lagu muransan yahay; tubraac wada-hadal daabacan ayna ansixiyeen dhammaan Dawladgoboleedyadu | Wax-ka-beddellada dastuur ee lagu muransanyahay lafaguray geeddi-socod sharciyad leh oo loo dhanyahay; tubraaca dhammaystirka dastuurka oo lagu heshiiyey waddadana loogu xaadhay dowladda la dooran doono oo imanaysa |
| Xoojinta amniga qaranka iyo dejinta tubraac lagu gaaro kala-guurka bixidda ciidamada shisheeye | DMQ; Abbaanduulaha Ciidammada Qalabka Sida; Ciidammada amniga ee Dawladgoboleedyada | Diyaargarowga Ciidanka Xoogga Dalka: sii wadidda tubraaca kala-guurka ciidammada shisheeye waxaana la shaacinaya dhammaadka Muddo-xileedka DMQ (Sebteembar 2026) | Tababarka iyo diyaargarowgacii danka Xoogga Dalka oo la xoojiyay; qorshe la shaaciyay oo lagu soo afjarayo joogitaanka ciidammada shisheeye, ka hor dhammaadka muddo-xileedka DMQ | Jawi amni oo xasilloon oo suuragelinaya doorashada Maarso 2028; qorshe kala-guur qeexan oo ku aaddan ciidamada shisheeye oo waafaqsan ballanqaadka waajibaadkooda |
| Sugidda hannaanka dammaanadaha caalamiga ah iyo habraaca kormeerayaasha | DMQ; DG-yada; US, UNTMIS, IGAD, AU, EU, UK | Ugu dambayn 30 maalmood gudahood, ka dib dhisidda DMQ (Juun 2026) | Heshiisyo dammaanadqaad geeddi-socod oo la saxiixay; habraacyada korjoogtaynra caalamiga ah iyo u- | Korjoogtayn caalami ah oo ku aaddan geeddi-socodka doorashada iyo maamulka kala-guurka; ka-hortagka dhan ah |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | kuurgalayaasha oo la hawlgeliyay; hab madax-bannaan oo khilaafaadka lagu xalliyo oo lagu heshiiyey | tallaabooyin dastuuri ah oo hal dhinac ahi qaado inta lagu jiro kala-guurka |
| Qabashada doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha | GMDX; DMQ; DG-yada; markhaatiyaal caalami ah | Ugu dambayn 31 Maarso 2028 (waqti kama dambays ah oo aan dib loo dhigi karin) | Doorasho madaxweyne oo xor ah, caddaalad ah, oo lagu kalsoonaan karo oo la qabtay; natiijooyinka oo lagu xaqiijiyay hannaan madax-bannaan oo khilaafaadka lagu xalliyo; madaxweyne cusub oo la dhaariyay | Sharciyadda dimuqraadiyadeed oo la soo celiyay; muddo-xileledka kala-guurka ee DMQ wuxuu dhammaanayaa marka la dhaariyo madaxweynaha la doortay. |

**Gunaanad**

Jamhuuriyadda Saddexaad ee Soomaaliya waxay taagan tahay marxaladdii ugu xasaasiyad-sanayd uguna saamaynta badnayd tan iyo markii lagu aasaasay dowladdii lagu soo dhisay Carta, Djibouti sanadkii 2000. Qalalaasaha Dastuuriga ah ee ka dhashay wax-ka-beddelladii Dastuurka ee baarlamaanku ansixiyay bishii Maarso 2026 wuxuu sii xoojiyey sannado badan oo kalsooni-darro is-biirsatay u dhexeysay dowladda federaalka, Dowlad-Goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, iyo mucaaradka siyaasadeed. Haddii aan heshiis wada-xaajood loo dhan yahay la gaarin ka hor bisha May 15 keeda, 2026, dalku wuxuu wajihi karaa sheegashooyin sharciyadeed oo is barbar yaacaya, maamul kala daadsan, iyo xaalad amni oo si degdeg ah u sii xumaanaysa, taasoo dib u dhigi karta horumarkii dhismaha dowladnimada ee jiil dhan la soo waday. Waxaa ka sii daran, walaaca laga qabo saamayn ka dhalan karta dagaalka Bariga Dhexe iyo xasillooni darrada siyaasadeed iyo dhaqaale ee caalamka ka jirta maanta, taa oo aan la saadaalin karin dalal iyo xuduuddo cusubna lagu abuurayo.

Intaa waxaa dheer, Soomaaliya oo siyaasad ahaan aan xasilloonayn isla markaana bulsho ahaan kala qaybsan, waxaa laga yaabaa in aysan ka badbaadi karin jawiga siyaasad-degaaneed (geo-politics) ee hadda jira. Beesha caalamka waxay garab istaageen dolwlad dhiska Soomaaliyeed ee lagu jiray soddonkii sano ee la soo dhaafay taas oo aysin dhalin dowladnimo xasilloon oo isku filan, haddanay aysan hawlahaas u nugleyn iayadoo tartan calami oo awood sheegasho ah ka taagan yahay marinka Bab al-Mandab iyo Badda Cas.

Soo-jeedintani waxay ku talinaysaa tubraac macquul ah oo loo dhanyahay, si horay loogu socdo. Waxay ka codsanaysaa dhinac kasta in uu aqbalo wax ka yar waxa uu doonayo. Dowladda federaalku waxay aqbalaysaa kala-guur loo maro awood fulineed; mucaaradku wuxuu aqbalayaa jadwal doorasho oo ku beegan Maarso 2028, halkii uu ka doonayay taariikh ka horreysa; Dowlad-Goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka waxay aqbalayaan in ay dib ula falgalaan hay'adaha federaalka iyo tubraac cusub oo loogu talagalay qabsoomidda doorashooyinka deegaanka iyo kuwa gobollada; dhammaan madaxda xilalka hayaana waxay aqbalayaan tartan doorasho oo aanay jirin cid gaar ah oo ka faa'iidaysanaysa awood hay'adeed oo u eexata. Tanaasullaadaasi waa qiimaha aynu siisanayno sii-jiritaanka dowladnimadeena.

Guushu waxay ku xirantahay hadba sida deg-degga iyo niyad-wanaagga ah ee hoggaamiyeyaasha Soomaaliya u dhaqmaan. Fursadda heshiis lagu gaari karo waa mid ciriiryoon. Saaxiibada caalamiga ahi waxay diyaar u yihiin in ay taageeraan heshiis siyaasadeed oo ay Soomaali hoggaaminayso, Soomaaliduna leedahay oo ku dhisan Dastuur, isla markaana si hufan loo fuliyo. Shacabka Soomaaliyeed oo markii ugu horreysay tan iyo burburkii dowladdii dhexe, soddon sannadood ka hor, xaq u yeelan doona in ay codkooda dhiibtaan iyagoo ku dooranaya nidaamka qof iyo cod ayaa ah daneeyayaasha ugu muhiimsan uguna faa'iidada badan heshiiskan. Sharciyadda dowladda dhalan doonta, iyo sii jiridda Jamhuuriyadda Saddexaad lafteedu waxay ku xiranyihiin daahfurnaanta iyo qummanaanta geeddi-socodka lagu soo dhisayo.

**Tixraacyo**

Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya

Dastuurkii Soomaaliya ee 1960

Reuters (2026). Somali parliament backs constitutional changes that could extend president's term.

Somali Public Agenda (2024). Addressing contentious issues on elections in the constitutional review process. Rift Valley Institute.

Mohamud, Abdinur (2012). Permanent Statehood at Last for Somalia? Foreign Policy in Focus, Washington, Dc.

______ (2011). The Balkanization of Somalia. Foreign Policy in Focus, Washington, Dc.